



## Australian Government

### Department of Health

#### Fududaynta Xaddidaadaha

Australia waxay si guul leh 'u fidisay qalooca garaafka' iyo tirada kiisaska cusub ee COVID-19 ee waddanka oo dhan xilligan oo aad u yar. Waxaan hadda bilaabi karnaa inaan qaadno talaabooyin taxaddar leh si aan u yareyno qaar ka mid ah xannibaadaha naga caawiyay xakameynta faafitaanka fiyruskan.

Marwalba waxa jirey kala duwaan sida COVID-19 uu ugu fiday gobolada iyo dhulalka. Golaha Qaranka ayaa isku raacey qorshe saddex-tallaabo ah oo si qunyar ah looga qaadayo xaddidaadda aasaaska ah ee u dhexeysa hadda iyo bisha Julaay taas oo tixgelinaysa arrintan. Qorshuhu wuxuu ku saleysan yahay tallada khabarada ee Guddiga Maamulayaasha Ilaalinta Caafimaadka Australia.

Qorshahan Gobollada iyo Dhulalka waxay u gudbi karaan talaabooyinkan xawaare kala duwan, iyadoo ay ku xidhan tahay duruufahooda.

Markii aan u dhaqaaqno inaan ku noolaano COVIDSafe Australia, dhammaanteen waxaan weli u baahanahay inaan ku dhaqano kalafogaashaha bulshada iyo nadaafad wanaagsan. In ka badan waligeed, waa muhiim in dadku gurigooda joogaan haddii ay xanuun dareemaan - xiitaa haddii ay tahay xanuun yar.

Barnaamijka telifoonka ee COVIDSafe wuxuu sidoo kale ka caawin doonaa inuu sii hayo qoysaska, saaxiibbada iyo jaalliyadaha COVIDSafe.

Guusheena aan ka gaadhney helitaanka COVIDSafe si aan u khafiifino xaddidaadaha waxey ku xiran tahay innaga - shaqsi ahaan - qaadashada mas'uuliyadda iyo ka dhigista dabeecadaheen qaar ka mid ah nolol maalmeedkeena. Markasta oo aad guriga ka tageysid ka fikir sida aad u badbaadinalaheyd naftaada, qoyskaaga, asxaabtaada iyo dadka aad wada shaqeysidba.

Qorshaha 3-da talaabo wuxuu siinayaa Australiyaanka hubin badan oo ku saabsan waxa dhici doona bilaha soo socda. Mid kasta oo ka mid ah xannibaadaha ugu waaweyn waxaa jira saddex tallaabo oo muhiim ah oo u dhaxweysa halka aan hadda joogo iyo meesha aan dooneyno inaan ahaano.

Tallaabooyinka ugu horreeya waa kuwo taxaddar leh maadaama ay muhiim tahay in ay naan u dhaqaaqin si dhakhso ah oo aynaan u lumin dhulkii aynu gaadhney. Ganacsiyada qaarkood waxay bilaabi doonaan inay dib u furaan markaan bilowno inaan u ogolaano kooxo ilaa 10 qof ah inay guryahooda iyo bulshada dhexdeedaba ku wada kulmaan. Tallaabooyinkan koowaad waxay naga caawin doonaan bilaabidda dib-u-dhiska dhaqaalaheena, waxayna na siinaysaa fursado badan oo aan kula xiriirno qoyska iyo saaxiibbada fool ka fool.

Tallaabooyinka labaad ayaa tan lagu dul dhisi doonaa iyada oo la adeegsanayo isu imaatinno waaweyn iyo meherado badan oo dib loo furay. Maaddaama ganacsiyadu ay qaadayaan tillaabooyin lagu hubinayo inay yihiin COVIDSafe, waa inaan dhammaanteen dareemeynaa amaan iyo isku kalsooni in aan sameyno qaar ka mid ah waxyaabihii aan ka seegney bilihii lasoo dhaafay. Waxyaabaha halista sare leh wali waa la xaddidi doonaa.

Tallaabooyinka seddexaad waxay bilaabmi in si buuxda u qaadano COVIDSafe qaabab nololeed mudo dheer oo ah dareeqa aan u nolaano iyo shaqeyno. Tani waxay noo noqon doontaa 'caadi cusub' inta fayrasku wali khatar yahay. Xaddidaadaha waa la yareyn doonaa. Isku imaatinka ilaa 100 qof, safarada gobolada dhexdooda, koritaanka ciyaaraha bulshada, iyo suurtagalnimada safarka New Zealand, waxaa lagu saleyndoona ficillada COVIDSafe ee caalamiga ah. Xannibaadaha qaarkood, ee ku saabsan waxyaabaha sida socdaalka caalamiga ah iyo isu imaatinka ballaaran, ayaa weli jiri kara.

Golaha Qaranka wuxuu si joogto ah dib-u-eegis ugu sameyn doonaa horumarkena si aan hore ugu soconno si amaana.

Australia waa inay filaan kororka lamabarka kiisaska ama faafitaanka oo suurogal ah maadaama xaddidaadaha la fududeynayo. Qorshahan ma ahan ku soo laabashada nolosheena kahor COVID-19, laakiin wuxuu ku saabsan yahay barashada sida loogu noolaanlahaa COVIDSafe.

Haddii qof walba kaalintiisa ciyaaro, waxaan dhisi doonaa COVIDSafe Australia, halkaas oo aan nololaha iyo hab-nololeedkaba lagu ilaaliyo labadaba.